



SHURUUCDA ANDT DUGSIGA ÅKRAHÄLL

Hadafka kowaad ee **Dugsiga Åkrahäll sharciyadiisa ANDT** waa in lagu dhiiri geliyo shakhsiyaadka ku jira dugsigu inay ka foogaadaan **Khamrida, Mukhaadaraadka, Xashiishada iyo Buuriga**. Ololaha kahortaga ee macluumaadka, waxbarashada, baadhitaanka mukhaadaraadka, iyo sidoo kale nidaamka jacaylka iyo taageerada,

- Shuruucan iyo qorshaha hawleedku waxaa looso badhigaa koriyayaasha ardayda bilawga dugsiga
- Shuruucdan ku saabsan ANDT waxaa laga heli karaa websaytka dugsiga
- Habdhaqanka khamrida iyo mukhaadaraadka waxaa lagaga hadlaa inta ay waxbarashadu socoto
- Maqnaanshaha ardayda waa diwaan geliyaa waanan lala socdaa
- Cabista buuriga iyo isticmaalka sigaarka eletorooniga ah waa ka mamnuuc meel kasta oo dugsiga ka tirsan
- Waa mamnuuc in la bixiyo, kaydiyo, ama lagu sakhraaco khamri ama mukhaadaraad inta dugsiga lagu jiro
- Calaamadaha mukhaadaraadka lagama ogola dugsiga gudahiisa
- Marka la siiyo mid kamid ah kabadhada dugsiga ardayga ama meel uu wax ku kaydsan karo, dugsigu waxa uu baadhi karaa kabadhka/meesha hadii looga shakiyo mukhaadaraad, khamri ama waxyaabo kale oo lagu kayd in karo kabadhka
- Dugsigu waxa uu la shaqeeyaa adeegyada bulshada iyo bilayska, iyo kuwo kale. Dugsiga waxa uu keeni karaa ayda wax uriya xaaladaha qaar
- Wixii caafimaadka shaqada ah iyo rabitaankaayaga dugsi mukhaadaraadka ka madaxbanaan si loo helo jawi dugsi oo badbaado iyo xaalad waxbarasho oo wanaagsan, dugsigu waxa uu baadhitaan mukhaadaraad ku samayn karaa koox kamid ah kooxaha waxbarashada. Shaybaadhku waa ikhtiyaar, laakiin waxaa dhici karta inuu shardi u noqdo ardayga si uu iga qayb geli karo hawlaha shaqo barbarka iyo waxbarashada leh hawlaha khatarta ah

Shuruucdan waxaa lagu sameeyay iskaashi ardayda iyo shaqaalaha Dugsiga Åkrahäll ee Nybro. Waxaa is badal lagu sameeyaa sanadkii (dib u eegid lagu sameeyay Maay 2018/J.E)